



Federal Republic of Somalia
Office of the President

SHARCI LR. 28

TAARIKH: 08/07/2014

OGGOLAANSHAHA SHARCIGA DHISIDDA GOLAHA ADEEGGA GARSOORKA

MADAXWEYNAHA J.F.S,

Markuu Arkay: Qodobka 87aad, Xarafka ' C ' iyo Qodobka 90aad, Xarafka 'F' ee Dastuurka J.F.S.

Markuu Arkay: Qodobada 111aad iyo 111A iyo 113 ee Dastuurka J.F.S

Markuu Arkay: Xeerka Nidaamka Garsoorka Lr. 34 ee soo baxay 22/09/1974

Markuu Arkay: Go'aanka ansixinta Sharciga Dhisidda Golaha Adeegga Garsoorka Ref: 290/3/1/14, taariikh Juun 30, 2014

Markuu Garwaaqsaday: baahida loo qabo in si degdeg ah loo dhiso Golaha Adeegga Garsoorka si loo dadar loo habsocodka garsoorka

Wuxuu soo saaray Xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo Maalinta uu Madaxweynaha Jamhuuriyadda Soomaaliyeed Saxiixo Xeerkaan, waxa uu Madaxwaynuhu oggolaaday Ansaxinta Sharciga Dhismaha Golaha Adeegga Garsoorka

Qodobka 2aad.

Waxaa la baab'iyay wixii Xeer ama Sharci ah ee ka soo horjeedo ama ka hor imaanaayo Sharcigan

Qodobka 3

Waxa uu Xeerkan dhaqangelayaa maalinta uu Madaxwaynuhu Saxiixo waxaana lagu soo saaraya Faafinta Rasmiga ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed.

MUQDISHO, 08/07/2014

XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD WAA LA DIWAAN GELIYAY DIWAAN NO. HAN/030/2014 TAARIKH 2/08/2014 SAXIIXA NO. _____
--



Madaxweynaha J.F.S
Mudane Xasan Sheekh Maxamuud



Federal Republic of Somalia
House of the People
Office of the Speaker

Ref: 290 /3/1/14:الرقم

Mogadishu, Juun 30, 2014 التاريخ

Ku: Madaxweynaha Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Muqdisho.

Ku: R/Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya
Muqdisho.

Og: Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Dastuurka
Muqdisho.

Og: Garyaqaanka Guud ee Dawladda.
Muqdisho.

Og: Hantidhowka Guud ee Dawladda
Muqdisho.

Og: Guddiga Garsoorka, Awqaafta iyo Arrimaha Diinta.
L/H. Golaha Shacabka.

Og: Xoghayaha Guud Ee Golaha Shacabka.
L/H. Golaha Shacabka.

Og: Agaasimaha Waaxda Shuruucda.
L/H. Golaha Shacabka.

Ujeedo: Ansixinta Sharciga Dhisidda Golaha Adeegga Garsoorka.


M.ne Madaxweyne;

Waxaan kuugu wargelinayaa inuu Golaha Shacabka Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya go'aan ka gaaray ansixinta Sharciga Dhisidda Golaha Adeegga Garsoorka oo halkan ku lifaaqan, wuxuuna Golaha Shacabka fadhigiisii 45aad ee Kalfadhiga 4aad taariikhda markay aheyd Juun 30, 2014 oo ka dhacay Xaruntiisa Caasimadda Jumhuuriyadda ee Muqdisho ku ansixiyey cod furan oo u dhacay sidatan hoos ku xusan:

- Xildhibaan Oggolaadeen: 79 (Todobaatan iyo Sagaal).
- Xildhibaan diidey: 59 (Khonton iyo Sagaal).
- Xildhibaan ka aamustay 9 (Sagaal).

Haddaba, M.ne Madaxweyne waxan si waafaqsan Qodobka 90-aad xarafka (f) ee Dastuurka JFS kaaga codsanaynaa in aad go'aanka Golaha ku oggolaato Xeer-Madaxweyne, si uu Sharci u noqdo looguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jumhuuriyadda Soomaaliya si waafqsan Qodobada 84-aad iyo 85-aad ee Dastuurka oo sida Ku-meel-gaar loo Ansixiyey.

Anigoo huba in waajibkaaga Dastuuriga aad ka gudan doonto, waxaad magaca Golaha Shacabka nooga guddoontaa salaan diiran iyo qaddarin gaar ah.


M.ne Muxammad Sh. Cusmaan "Jawaari"
Guddoomiyaha Golaha Shacabka




MJ/AM

**ANSIXINTA SHARCIGA DHISIDDA GOLAHA
ADEEGGA GARSOORKA**

Guddoomiyaha Baarlamaanka JFS


Tirada Xubnaha Codeysay 147: Oggol (79)- Diidmo (59) - ka aamustay (9)



Taariikh: Juun 30,2014

Saxiix: M.ne Muxammad Sh. Cusmaan "Jawaari"


Guddoomiye ku-xigeenka 1aad- Baarlamaanka JFS



Taariikh: Juun 30,2014

Saxiix: M.ne Jeylaani Nuur Iikar

Guddoomiye ku-xigeenka 2aad- Baarlamaanka JFS



Taariikh: Juun 30,2014

Saxiix: M.ne Mahad Cabdalla Cawad



Sharciga Dhisidda Golaha Adeegga Garsoorka

Taariikhda la Ansixiyey
Juun 30, 2014

Sharci Lam. _____

Taariikh: _____

Sharciga Dhisidda Golaha Adeegga Garsoorka

Cutubka 1: Qodobada Guud

Qodobka 1aad: Ujeeddada Sharciga

Sharcigan Waxaa lagu dhisay Golaha Adeegga Garsoorka si waafaqsan Qodobada 109A iyo 111A ee Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

Qodobka 2aad: Madaxbanaanidda Golaha

1. Golaha Adeegga Garsoorka marka uu gudanayo xilkiisa waa ka madaxbannaan yahay awoodaha laanta Sharcidejinta, laanta fullinta iyo hay'ad kasta oo kale wuxuuna u hogaansamayaa oo keliya Dastuurka iyo shuruucda kale ee Dalka.
2. Golaha Adeegga Garsoorka wuxuu u xil saaran yahay:
 - a. In uu Xaqiijiyo madax-bannaanida iyo dhexdhexaadnimada Garsoorka heerka Dawladda Federaalka ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya iyo Maxkamadda Dastuurka.
 - b. Maamulka Garsoorka oo ay ka mid yihiin shaqo qorista, ruqseynta iyo tallaabo sharci ka qaadista liddi ku ah Garsoorayaasha maxkamadaha heerka Dawladda Federaalka ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya iyo Garsoorayaasha Maxkamadda Dastuurka.

Qodobka 3aad: Maqaamka Golaha

1. Golaha Adeegga Garsoorka wuxuu leeyahay shakhsiyad qaanuuneed oo uu ku saxiixi karo heshiisyo kuna gudan karo hawlaha sharciyeed kale oo lagama maarmaan u ah habsami u socodka hawlaha Garsoorka iyo xil gudashadiisa.
2. Golaha Adeegga Garsoorka wuxuu sameysanayaa shaabad iyo astaan u gaar ah.

Qodobka 4aad: Xarunta Golaha

1. Xaruunta Golaha Adeegga Garsoorka waa Muqdishu, Caasimadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
2. Golaha Adeegga Garsoorka wuxuu hawlahiisa ku qabsan karaa meel kasta oo ka mid ah Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya haddii dhageysiga dacwadaha ama daruufo gaar ah ay ku kallifaan.

Qodobka 5aad: Xilalka iyo Awoodaha Golaha

1. Golaha Adeegga Garsoorka waxuu yeelan doonaa xilalka iyo awoodaha soo socda:
 - a. Magacaabista, Dalacsiinta, Bedelaadda, Ruqseynta iyo anshaxmarinta xubin kasta oo ka tirsan Garsoorka ee heerka Dowladda Federaalka iyo Maxkamadda Dastuurka sida ku xusan Qod. 111 A ee Dastuurka iyo Xeerka Nidaamka Garsoorka ee Jamhuuriyadda ;
 - b. Go'aan ka gaarista mushaharaadka iyo xaqqa hawlgabka garsoorayaasha iyo hawlwadeenada ee heerka Dawladda Federaalka iyo Maxkamadda Dastuurka;
 - c. Dejinta habsami u socodka iyo tayeynta heerarka iyo xaaladaha shaqada ee Garsoorka heerka Dawladda Federaalka iyo Maxkamadda Dastuurka;
 - d. Talasiinta Xukuumadda Federaalka arrimaha ku saabsan sharci kasta ama arrimaha saameeynta ku leh Garsoorka oo ay soo codsato Xukuumadda Federaalka ama isla Golaha toos u curiyo ; iyo
 - e. In uu fulliyo wixii waajibaad kale oo uu sharciga ama Dastuurka u xilsaaro.
2. Sagaashan maalmood gudahood oo ka bilaabata maalinta la magacaabay, Golaha Adeegga Garsoorka waa in uu mudnaanta koowaad siiyaa dajinta qorshaha imtixaamidda dhammaan garsoorayaasha iyo hawlwadeenada hadda xilka haya ee heerka Dawladda Federaalka, oo aan xilalka ay hadda hayaan ku iman si waafaqsan Qod. 118 (5) ee Dastuurka Federaalka iyo Qod.19 (1) ee Xeerka Nidaamka Garsoorka. Xubnaha hadda xilka haya iyo xubnaha cusubba waxaa jagooyiinka dib loogu kala meeleenayaa hadba sida ay ugu kala guuleystaan imtaaxaan tartan furan.
3. Inta laga dhamaystirayo jagooyinka qaabka Garsoorka ee heerka Dawladda Federaalka, Garsoorayaasha iyo howlwadeennada hada xilka Garsoorka haya waxay ahaanayaan sii hayayaalka hawlaha iyo xilka Garsoorka.
4. Habraacyada uu Golaha Adeegga Garsoorka ku fullinaayo awoodihiisa iyo xilalkiisa oo aan ku qeexneen Sharcigan ama Xeerka Nidaamka Garsoorka ama Shuruucda kale ee Dalka, wuxuu ku dhaqmayaa Xeer-hoosaad uu Golaha ku Ansixiyo cod aqlabiyadda xubnaha Golaha.

Cutubka 2aad: Dhismaha Golaha

Qodobka 6aad: Xubnaha Golaha

1. Sida ku xusan Qodobka 109A ee Dastuurka Federaalka Jamhuuriyadda Soomaliya, Golaha Adeegga Garsoorka wuxuu ka kooban yahay sagaal (9) xubnood oo kala ah:
 - a. Garsooraha Sare ee Maxkamadda Dastuurka;
 - b. Garsooraha sare ee Maxkamadda Sare;
 - c. Xeer-ilaaliyaha Guud;
 - d. Guddoomiyaha Guddiga Xuquuqul Insaanka;
 - e. Labo Qareen Sare oo xubin ka ah Ururka Qareenada Soomaaliyeed uu soo magacaabay Golaha Qareenada Soomaaliyeed oo xilka haynayaa muddo afar sano;
 - f. Seddex qof oo sumcad sare ku leh bulshada Soomaaliyeed dhexdeeda oo Golaha Wasiirada soojeediyo Madaxweynaha Jamhuuriyaddana ku magaacaabo xil hayn muddo afar sano oo hal mar keliya la cusbooneysiin karo,
2. Xubnaha uu Madaxweynaha ku magaacaabo sida ku xusan Faqradda (1) (e) iyo (f) ee Qodobkan, kama mid noqon karaan xubnaha Baarlamaanka, Golaha Wasiiradda, Golaha fulinta ee xisbi siyaasadeed, ama uu hayo jago wax u dhimi karta madaxbaanida Golaha Adeegga Garsoorka.
3. Xubnaha Golaha Adeegga Garsoorka waxay xilka haynayaan hal xilli oo Shan sano ah waxaana la cusbooneysiin karaa hal mar oo keliya.
4. Markii ay xubin Golaha ka tirsan jago baneeyso, Guddoomiyaha Golaha Adeegga Garsoorka wuxuu todoba maalmood gudahood codsi ujeedinayaa hadba hay'adda magacaabista xubinta jagada baneysay u xilsaaran:
 - a. Si waafaqsan faqradda (1) ee Qodobkan, in kow iyo labaatan maalmood gudohooda ka bilaabato maalinta codsiga Guddoomiyaha Golaha jeediyey lagu soo magacaabo xubinta cusub ee dhamaystireysa muddada ka harsan xilhaynta asalka aheyd.
 - b. Xubinta cusub ee dhameystireysa muddada ka harsan xilheynta asalka ah waxaa lagu soo magacaabayaa hadba habraaca waafaqsan sidii horey loogu soo magacaabay.

Qodobka: 7aad: Habraaca Magacaabista Xubnaha Golaha Adeegga Garsoorka

Muddo 30 Maalmood gudaheeda oo ka bilaabata maalinta sharcigan uu saxiixo Madaxweynaha laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ee Jumhuuriyadda Soomaaliyaah:

1. Wasiirka ay khuseyso ayaa u soojeedinaya Golaha Wasiirada magacyada musharaxiinta Golaha Adeegga Garsoorka oo lagu soo xulay si waafaqsan Qod.109A ee Dastuurka.
2. Golaha Wasiirada marka ay ansixiyaan ka dib waxey Baarlamaanka Federaalka u soo gudbinayaan magacyada sagaalka Musharax oo lagu soo xulay si waafaqsan Qododka 6-aad ee Sharcigan;
3. Laga billaabo taariikhda soojeedinta Golaha Wasiirada soo gaarto Baarlamaanka Federaalka wuxuu ka baaraandegeyaa kana go'aan gaarayaa 30 maalmood gudahood una dirayaan Madaxweynaha Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;
4. Madaxweynaha Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, oo ka baaraandegey Qodobka 90 (f) ee Dastuurka , wuxuu :
 - a. 30 maalmood gudahood ku oggolaanayaa Xeer Madaxweyne kuna soo saarayaa Faafinta Rasmiga ee Jumhuuriyadda Soomaaliya si waafaqsan Qodobka 90 (f) ee Dastuurka;
 - b. Xubnaha Golaha lagu soo gudbiyey faqradda (3) ee Qodobkan qoraal rasmi ah ugu wargeliyaa xubinnimada loo magacaabay,
5. Haddii hal musharax ama ka badan uu Golaha Shacabka uu ansixin waayo, waxaa Golaha Wasiirada soo magacaabaya musharax ama musharixiin cusub si waafaqsan habraaca ku xusan faqradda (1-3) ee Qodobkan.

Qodobka 8aad: Shuruudaha Magacaabista

1. Dhammaan dadka lagu magacaabay habraaca ku xusan qodobka 7aad ee sharcigan waa in ay buuxiyaan shuruudaha soo socdo:
 - a. Inuu yahay muwaadin Soomaali ah oo Muslim ah;
 - b. in ay da'diisu ka weyneyn 65 jir;
 - c. in uu leeyahay caafimaad wanaagsan u suurto-geliya gudashada waajibaadkiisa;
 - d. in uu haystaa shahaado jaamacadeed oo la aqoonsan yahay, bartayna shareecada Islaamka ama Qaanuunka ;
 - e. in uu leeyahay waayo-aragnimo la xiriirta hawlaha garsoorka ama adeegga guud ee maamulka dowladda;

- f. in taariikh-nololeedkiisa ka maran yahay sumcad-xumo shakhsiyadiisa wax u dhimi karta ama su'aallo ka iman kara hufnaantiisa iyo daahfurnaantiisa;
- g. In xukun maxkamadeed kama dambays ah aanay hore ugu dhicin.

Qodobka 9aad: Qaab-dhismeedka iyo Waajibaadka Guddoonka Golaha

1. Golaha Golaha Adeegga Garsoorka wuxuu ka kooban yahay xubnaha soo socda:
 - a. Guddomiye;
 - b. Guddomiye Ku-xigeyn;
 - c. Xoghayaha iyo
 - d. Lix Xubnood
2. Xubnaha xilkooda uga mid ah Golaha waxey kala yihiin kuwa soo socda:
 - a. Guddoomiyaha Maxkamadda Dastuurka
 - b. Guddoomiyaha Maxkamadda Sare
 - c. Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka iyo
 - d. Guddoomiyaha Guddiga Xuquuqul Insaanka.
 - e. Xubnaha ku xusan Faqradda (2) ee Qodobkan, waxey Golaha xubin ka ahaanayaan inta ay hayaan xilalka ay ku kala magacaaban yihiin.
3. Golaha Adeegga Garsoorka wuxuu xubnihiisa ka dhex dooranaaya Guddoomiye iyo Guddoomiye Ku-xigeen si waafaqsan Qodobka 109 A (3) ee Dastuurka.
4. Guddoomiyaha waa Madaxa Golaha Addeega Garsoorka wuxuuna masúul ka yahay arrimaha soo socda:
 - a. Isugu yeeridda iyo Guddoominta shirarka Golaha Adeegga Garsoorka;
 - b. Hagidda iyo u kuurgelidda hawlaha Xoghaynta Golaha Addeega Garsoorka;
 - c. Xoojinta iyo joogteynta xiriirka shaqo u dhexeeya Golaha Adeegga Garsoorka iyo Wasaaradda Garsoorka iyo Hayádaha kale ee Qaranka;
 - d. U kuurgelidda iyo hubinta in habraaca Anshaxmarinta loo fuliyo sida Sharcigan ku qeexan; iyo
 - e. Fulinta wixii waajibaad kale uu sharciga u xilsaaro.
5. Guddoomiye Ku-xigeenka wuxuu masúul ka yahay arrimaha soo socda:
 - a. Hawl kasta oo uu u xil saaro Guddoomiya Golaha Adeegga Garsoorka;

- b. In uu qabto hawlaha iyo waajibaadka Guddoomiyaha Golaha Adeegga Garsoorka marka uu maqan yahay Guddoomiyaha ama ku timaado xaalad uu la xilgudan waayo;
- c. Hawl kasta oo la xiriira habraaca anshaxamarinta sida ku qeex sharcigan; iyo
- d. Fulinta wixii waajibaad kale uu sharciga u xilsaaro.

Qodobka 10aad: Xoghaynta Golaha

1. Golaha Adeegga Garsoorka wuxuu yeelanayaa Xoghayn oo ka kooban Madaxa Xoghaynta iyo hawladeeno maamuleed ee loo baahan yahay si ay fuliyaan hawlaha xafiisyada Golaha ugana hawlgalaan si waafaqsan Sharciga Shaqaalaha Rayidka ee Dawladda.
2. Madaxa Xoghaynta Golaha waxaa magacaabaya Guddoomiyaha Golaha Adeegga Garsoorka.
3. Xilgudashada Xoghaynta Golaha waxaa u xilsaraan lana xisaabtamaya Guddoomiyaha Golaha Adeegga Garsoorka.
4. Haddii uusan Golaha Adeegga Garsoorka arrin gaar ah uu galayo awgeed si kale u go'aasanin, Madaxa Xoghaynta wuxuu xaq u leeyahay in uu ka qayb galo kulamada Golaha isagoo aan leheyn xaq codeynta ah.
5. Xoghaynta waxey masúul ka tahay hawlgelinta xafiisyada maamulka ee Golaha Adeegga Garsoorka kuwaasoo oo ay ka mid yihiin:
 - a. Fulinta hawlmaalmeedka xafiisyada Golaha iyo kormeeridda shaqada hawladeenada maamulka oo aan ka mid ahayn xubnaha Golaha ku xusan Qodobka 6aad ee Sharcigan;
 - b. Bandhigidda jago kasta oo garsoor ee bannaanaata;
 - c. Qabashada iyo marinta habraaca ku haboon araajida shaqo qorista, dalacsiinta iyo beddelaada Garsoorayaasha, sidoo kale habraaca loo maro dacwadaha lidka ku ah Garsoorayaasha heer Federaal iyo hawladeenada maamulka garsoorka;
 - d. Diyaarinta qorsho hawleedka sanadlaha iyo miisaaniyad sanadeedka Golaha;
 - e. Keydinta hadal-qoraalka iyo dukumentiga Golaha;
 - f. Dabagalka go'aannada Golaha;

- g. Ku wargelinta arrimaha khuseeya Guddiyada Adeegga Garsoorka ee Gobollada, gaar ahaan kuwa ku xusan Qodobka 29aad ee Sharcigan;
- h. Fulinta wixii waajibaad kale uu Guddoomiyaha ama Golaha u xilsaaro.

Qodobka 11aad: Xil waayidda Xubnaha Golaha

1. Xubnaha Golaha Adeegga Garsoorka waxay xilka ku waayi karaan arrimaha soo socda:
 - a. Haddii ay dhamaato mudada xil-haynta xafiis dowladeedkii uu uga mid ahaa xubinnimada Golaha ee ku xusan Qodobka 6aad faq (1) (a), (b), (c),(d) ee sharciga;
 - b. Haddii xubinta ku timaado awood darro jirka iyo maskaxda ah, bixinta sir xafiiseed, dhaqan xumo culus;
 - c. Ka maqnaansho 5 kulan oo isku xiga, Cudur daar la'aan ama fasax la'aan;
 - d. Haddii xubin uu soo magacawday Ururka Qareenada Soomaaliyeed ama Madaxweynaha magacaabay uu ka mid noqdo xubin Baarlamaan, Golaha Wasiiradda ama Golaha fullinta ee xisbi siyaasadeed ama uu qabto xil kale oo wax u dhimi karo madax-bannaanida Golaha si waafaqsan Qodobka 6 (2) ee sharcigan;
 - e. Haddii ay Geeri ku timaado;
 - f. Haddii uu iskiisa qoraal ahaan uga istiqaaloodo Xubinnimada isagoo hal bil ka hor bixiyay ogeysiis shaqo ka tagis ah;
 - g. Haddii xubinta lagu helo fal dambiyeed culus oo maxkamad si kama dambeys ah u xukunto, ama
 - h. Haddii Golaha go'aan kama dambeys ah ku gaaro xil ka-qaadista xubinta arrin anshax la xiriirta awgeed si waafaqsan axkaamta Sharciga.
2. Todoba maalmood (7) gudahood marka xil ka qaadis lagu sameeyo xubinta si waafaqsan faqrada (1) ee Qodobkan, Guddoomiyaha Golaha Adeegga Garsoorka wuxuu ka codsanayaa Hay'adda mas'uul ka ah ama laamaha Dowladda in ay soo magacaawdo bedelka xubintaas si waafaqsan Qodobka 6 (4) ee Sharcigan.

Qodobka 12aad: Kulamada Golaha Adeegga Garsoorka

1. Golaha Adeegga Garsoorka wuxuu yeelanayaa kulan caadi ah ugu yaraan labadii biloodba mar.

2. Guddoomiyaha wuxuu isugu yeeri karaa kulan aan caadi aheyn
3. Haddii seddex xubnood oo ka mid ah Golaha Adeegga Garsoorka ay codsadaan kulan aan caadi aheyn, Guddoomiyaha waa in uu isugu yeeraa kulan aan caadi aheyn.
4. Dhammaan kulamada Golaha Adeegga Garsoorka waxaa shir-Guddoominaya Guddoomiyaha. Haddii uu Guddoomiyaha maqan yahay waxaa shirka guddoominaya Guddoomiye Ku-xigeenka. Haddii labaduba ay maqan yihiin, xubnaha Golaha jooga ayaa iska dhex dooranaya Shir-guddoomiye ku meel gaar ah.

Qodobka 13aad: ka qeybgalka Dadweynaha iyo Daahfurnaanta

1. Kulammada Golaha Adeegga Garsoorka waa in ay ahaadaan kuwo dadweynaha u furan, dokumentiyadiisana dadweynuhu heli karaan hadba intii suurtagal ah Golahana awoodi karo
2. Kulan albaabada u xiran yahay oo aan dadweynuhu u furnayn wuxuu ku ansaxayaa go'aan ay taageeraan aqlibiyadda xubnaha Golaha jooga ee codeynaya marka fadhiga looga hadlaayo arrin guud ama gaar ahaaneed si waafaqsan Dastuurka ama Shuruucda Dalka .
3. Helitaanka galalka iyo dokumentiga uu diyaariyay Golaha Adeegga Garsoorka waxaa qarsoodi laga dhigi karaa haddii ay isku raacaan aqlabiyadda Golaha, xogta dokumentiga oo saameyn gaar ah ku leh arrin guud ama mid gaar awgiis si waafaqsan Dastuurka iyo Shuruucda Dalka,
4. Go'aan ka gaarista Faqradda (2) iyo (3) ee Qodobkan waxaa looga xaajoonayaa si maangal ah oo waafaqsan sharciga iyo Xeer Hoosaadka Golaha Adeegga Garsoorka.

Cutubka 3aad: Habraacyada Guddiga

Qodobka 14aad: Habraaca Go' aanka

1. Lix xubnood oo Golaha ka mid ah ayuu ka sameysmayaa guntanka (Quorum) kulanka Golaha Adeegga Garsoorka.
2. Golaha Adeegga Garsoorka wuxuu go'aankiisa ku gaarayaa cod aqlibiyad hal dheeri ah ee xubnaha Guntanka Golaha jooga.
3. Marka codeynta ku xusan faqrada (2) ee qodobkan is barbardhac noqoto Godoomiyaha ayaa codeynaya si uu isbarbar dhaca u jebiyo.

Qodobka 15aad: Magacaabista, Dalacaada iyo bedelka Garsoorayaasha

1. Dhammaan jagooyinka garsoorka waxaa rasmi ahaan u faafinayaa xoghaynta Golaha Adeegga Garsoorka.
2. Golaha Adeegga Garsoorka wuxuu dejinayaa nidaam ay ku qeexan yihiin shuruudaha lagu xulanayo garsoorayaasha, dalacaadooda iyo bedelka garsoorayaasha heer Federaal iyo Maxkamadda Dastuurka, markuu Madaxweynuhu saxiixana lagu soo saarayo Faafinta Rasmiga ee Jumhuuriyadda Soomaaliya.

Qodobka 16aad: Xeerka Dhaqanka Garsoorka

Golaha Adeegga Garsoorka wuxuu dejinayaa Xeer-dhaqameed suuban ee garsoorka kaa soo ka mid ahaanaya Xeer Hoosaadkiisa, laguna anshax marinaya xubnihiisa.

Qodobka 17aad: Dacwadaha Anshaxa

1. Qof kasta ayaa Golaha Adeegga Garsoorka ka furan kara dacwad lid ku ah xubin ka tirsan garsoorka.
2. Dacwad lagu furay sida ku xusan faqrada (1) ee qodobkan waa in ay:
 - a. Ahaataa qaab qiraal ah oo dacwad oogaha ku dhaaranaayo in eedeysi dhab tahay;
 - b. In nuxurka dacwadiisu si cad u qeexan tahay; iyo
 - c. In arrimaha xaqiijinaya dhabnimada dacwadiisa si cad u faahfaahsan tahay
3. Dacwad walba oo muwaadin usoo gudbiyo Golaha Adeegga Garsoorka waa in bil gudaheed lagu wargiliyo muwaadinka Garsooraha loo xilsaaray dacwadiisa;
4. Garsooraha loo xilsaaray dacwadda waa in uu go'aan kama dambays ah kasoo saaro dacwadda loo soo gudbiyay muddo 60 maalmood;
5. Si dacwadda u noqoto mid ku saleysan sharciga oo waafaqsan Faqradda (1) ee Qodobkan waa in ay ku xusan yihiin arrimaha soo socda:
 - a. In xubinta ka tirsan Garsoorka uusan laheyn karti ku filan gudashada xilalka Garsoorka;
 - b. In xubinta ka tirsan Garsoorka ay si ula-kac ah ama u dhaqma taxadir la'aan weyn oo jibinaysa Xeerka dhaqanka Garsoorka
 - c. Dhaqan kasta oo si ula-kac ah ama taxadir darro weyn oo lagu kaco lidna ku ah xil-heynta xafiiska Garsoorka.

Qodobka 18aad: Habka Dacwadda Anshax-marinta

1. Guddoomiyaha Golaha Adeegga Garsoorka ama xubintii kale ee ka mid ah Golaha Adeegga Garsoorka oo Guddoomiyaha u magacaabo gelidda dacwad Golaha ku soo gaartay si waafaqsan Qodobka 17 ee sharcigan uu go'aamiyo in dacwadda aysan ku saleysneyn si waafaqsan Qodobka 17 (5) ee Sharcigan ama aysan waafaqsaneyn habraaca ku cad Qodobka 17 (2) ee Sharcigan, Garsooruhu wuxuu islamarkiiba ku dhawaaqayaa iney dacwaddu tahay wax kama jiraan;
2. Guddoomiyaha Golaha Adeegga Garsoorka ama xubintii kale ee ka mid ah Golaha Adeegga Garsoorka oo Guddoomiyuhu u magacaabo gelidda dacwad waafaqsan Qodobka 17 (2) ee Sharcigan ama waafaqsan habraaca ku cad Qodobka 17 (5) ee sharcigan , Garsooruhu:
 - a. Haddii dacwaddu tahay mid culus oo keeni karta in garsooraha si ku-meel-gaar ah xilka looga fariisiyo ama ay sababeyso shaqo ka saaridda Garsooraha la soo eedeeyay , waxaa la dhisayaa Maxkamad Anshaxmarin oo dhageysata dacwadda la horkeenay si ay talooyinkeeda ugu gudbiso Golaha Adeegga Garsoorka;
 - b. Dacwado kale oo aan la culeys aheyn kuwa ku xusan Faqradda (2) (a) ee Qodobkan, waxaa la magacaabayaa Garsoore ka darajo sareeya ama la darajo ah Garsooraha laga dacwooday, si uu u soo baaro eedaha ku xusan dacwadda, talooyinkiisana u gudbiya Golaha Adeegga Garsoorka;
 - c. Haddii dacwadda ay khuseyso Garsoore ka tirsan Maxkamad Dawlad Xubin ka ah Federaalka waxaa dacwadda loo gudbinayaa Golaha Adeegga Garsoorka ee Dawladda Xubin ka ah Federaalka.

Qodobka 19aad: Dhisidda Maxkamadda Anshax-marinta

1. Guddoomiyaha Golaha Adeegga Garsoorka haddii looga baahdo in uu magacaabo Maxkamad Anshaxmarin sida ku xusan Qodobka 18 (2) (a) ama 21 (2) ee sharcigan, Guddoomiyaha waa inuu muddo macquul ku dhisaa Maxkamadda oo ka billaabata marka dacwadda Golaha ay soo gaarto;
2. Maxkamadda Anshaxmarin waa in ay ka kooban tahay seddex xubnood oo marka la magacaabayoo haya xil xafiis garsoor;
3. Marka xubin ka tirsan Maxkamadda Anshaxmarinta ay awoodi wayso in ay sii wadato hawsheeda sabab kasta awgeed, Maxkamaddu hawsheeda waxay ku sii wadaneysaa

labada xubnood oo ku sii harsan, haddii kale Maxkamaddu waa la baabi' inayaa oo mid kale oo cusub ayaa loo magacaabayaa.

Qodobka 20aad: Habraaca Maxkamadda Anshaxmarinta

1. Golaha Adeegga Garsoorka wuxuu dejinayaa xeerarka nidaamiya caddeymaha marag furidda iyo habraacyada lagu dhaqaayo garsooridda Maxkamadda anshax-marinta.
2. Xeerarka loo dejiyey fulinta xilalka Maxkamadaha anshax-marinta waa in ay guud ahaan xaqiijiyaan cadaaladda iyo habraaca dhageysiga dacwadaha si waafaqsan Dastuurka iyo Xeerarka caalamiga ah oo maqaamkooda la oggolyahay.
3. Maxkamadda anshax-marinta iyadoo aan marnaba ka baxeynin xayndaabka xuduudaha habraacidda ku nidaamsan Xeer-hoosaadka waxay u hawl galeysaa iney ilaaliso danaha cadaaladda iyo dhawrsanaanta dhexdhexaadnimada Garsoorka; iyadoo:
 - a. Soo uruuriyey caddeymaha xaqiijinaya marag furka;
 - b. Iney fuliso dhageysiga dacwadaha;
 - c. Iney sameeyso Xog uruurin;
 - d. Iney qadariso go'aanna ka gaarto eedaha; iyo
 - e. Iney garsooraha ku xukunto ciqaab u dhiganta eedaha lagu helay

Qodobka 21aad: Warbixinnada Maxkamadda anshax-marinta iyo talooyinka ay tixgelisay

1. Marka la dhageystay caddaymaha , iyadoo u hogaansan habraacyada iyo xeerarka ku qeexan Qodobka 20aad ee Sharcigan, Maxkamadda Anshax-marinta waxay Golaha Adeegga Garsoorka siinaysaa warbixin ka kooban xogta ay soo xigatay oo urursan, arrimaha ay tahay in mudnaan la siiyo go'aan ka gaarista eedaha iyo talooyinka kama dambeysta ah ee dacwadda nooceeda ku xalismayso
2. Golaha Adeegga Garsoorka marka ay soo gaarto warbixinta Maxkamadda Anshaxmarinta waxay qabsanayaan kulan muddeysan oo ay warbixinta uga baaraan dagayaan
3. Golaha Adeegga Garsoorka waxay eedeysanaha qoraal ahaan ugu wargelinayaan:
 - a. Waqtiga iyo goobta kulanka; iyo
 - b. Xaqa uu u leeyahay inuu qoraal ahaan uga soo jawaabo xog-warranka Maxkamadda Anshax-marinta
4. Golaha Adeegga Garsoorka wuxuu go'aan gaarayaa kadib markii uu ka baaraandego warbixinta Maxkamadda Anshax-marinta iyo jawaabta qoraalka ah si uu u hubiyo in

cabashada dacwaddu tahay mid sax ah, sharci ah oo waafaqsan Qodobka 17 (3) ee Sharcigan

5. Haddii Golaha Adeegga Garsoorka uu ka gungaaro :
 - a. In dacwaddu aysan wax sharci ah ku fadhiyin oo waafaqsan Qodobka 17 (3) ee Sharcigan, waa in ay joojiyaan dacwadda
 - b. Marka dacwadu ay ku fadhido sharciga si waafaqsan Qodobka 17 (3) ee Sharcigan, Golaha wuxuu xubinta ka tirsan hay'adda Garsoorka ee la soo eedeeyey ku qaadi karaa xukun ciqaabeedka ku habboon ee waafaqsan xeerka anshax-wanaagga Garsoorka.

Qodobka 22aad: Dib-u-Eegista Go'aanka Golaha

1. Golaha Adeegga Garsoorka go'aannadiisa oo dhan waa in ay ahaadaan garsoor sababeysan oo qoraal ah.
2. Haddii dacwadda uu diido Guddoomiyaha ama xubinta kale ee ka tirsan Golaha Adeegga Garsoorka uu Guddoomiyaha u magacaabay, dacwad ooguhu wuxuu afar isbuuc gudahood racfaan ka qaadan karaa go'aanka, Golaha Adeegga Garsoorka waa in uu u dhisaa Maxkamadda Anshax-marin oo kasoo baaraandegta racfaanka talooyina usoo gudbisa Golaha.
3. Dhammaan go'aanada kama dambayska ah ee Golaha Adeegga Garsoorka waxaa dib-u-eegis ku sameyn kara Maxkamadda Sare ee Federaalka.
4. Qof kasta oo doonaya in uu duro go'aanka uu gaaray Golaha Adeegga Garsoorka waa in uu afar usbuuc gudahood cabashadiisa u gudbiyaa Maxkamadda Sare ee Federaalka

Qodobka 23aad: Xasaanadda

1. Dhammaan xubnaha ka tirsan Golaha Adeegga Garsoorka oo ku xusan Qodobka 6aad ee Sharcigan waxaa loola dhaqmayaa sida xubno ka tirsan Garsoorka, lagamana qaadi karo xilkooda xubinnimo ee Golaha oo aan ka aheyn tallaabo anshax-marineed oo ay ku taliyeen Golaha Adeegga Garsoorka ayagoo ku gaaray go'aan aqlabiyeed
2. Dhammaan xubnaha ka tirsan Golaha Adeegga Garsoorka oo ku xusan Qodobka 6aad ee Sharcigan lama xiri karo, lama xanabi karo xurriyadiisa shakhsiyadeed, lamana baari karo hoygiisa iyadoo amar hore aan laga haysan Golaha Adeegga Garsoorka amarkaas oo ay ku gaareen aqlabiyad.

3. Xubin ama hawlwadeen ka mid ah Golaha Adeegga Garsoorka laguma qaadi karo dacwad madani ama mid ciqaabeed oo la xiriirta fal uu sameeyay ama uu gabay asigoo si sharci ah u gudanaayo waajibaadka Golaha.

Qodobka 24aad: ka qaadista Xasaanadda Xubnaha Garsoorka

1. Golaha Adeegga Garsoorka wuxuu xasaanadda ka qaadi karaa xubin kastoo ka tirsan garsoorka haddii Guddigu uu ku helo caddeymo ku filan in xubinta Garsoorka ay gashey dembi culus oo lagu muteysanaayo ciqaab xabsi ugu yaraan muddo seddex sano ah
2. Haddii Golaha uu gaaro go'aanka ku xusan Faqradda (1) ee Qodobkan, Golaha wuxuu awood u leeyahay in hay'adaha amniga uu u fasaxo iney baari karaan shaqsi ahaantiisa, hoygiisa ama ay xiri karaan xubinta ka tirsan Garsoorka si waafaqsan Qodobka 106 (3) ee Dastuurka.

Qodobka 25aad: Awoodda Golaha ee u yeeridda Dadka

1. Golaha Adeegga Garsoorka wuxuu u yeeri karaa qof kasta in uu Golaha horyimaado si uu caddeymo iyo xog uga siiyo arrimo la xiriira xil-gudashadiisa.
2. Golaha Adeegga Garsoorka wuxuu awoodi karaa in uu marag-fure uu dhaarmariyo ama ku amro in ay xoghaynta dhaariso ama qofkii uu hadba dhaarinta u igmado inta maragfuraha la wareysan ka hor.
3. Markhaatiga la hor keeno Golaha Adeegga Garsoorka wuxuu leeyahay xasaanad iyo xuquuq la mid ah markhaati kasta ee horyimaada Maxkamadda Sare ee J.F.S.
4. Qof kasta uu Golaha Adeegga Garsoorka ugu yeero inuu yimaado Golaha hortiisa maragfurid awgeed, wuxuu xaq u yeelanayaa kharajcelin uu go'aaminayo Golaha
5. Qof kasta oo Golaha Adeegga Garsoorka ugu yeerto si uu ula qabto hawlo la xiriira gudashada xilalkiisa wuxuu Golaha siinayaa gunno u dhiganta hawlqabadkiisa.
6. Qof kastoo lagu wargeliyo inuu yimaado Golaha Adeegga Garsoorka oo cudurdaar la'aan imaan waaya ama si ula-kac ah u diido in uu bixiyo dukumentiyoo uu Golaha ka codsadey ama uu diiday in uu ka jawaabo su'aalo kadib marka uu maray dhaarta markhaati ahaan awgeed waa dembiile waxaana lagu qaadayaa xukun ciqaab oo lamid ah xukunka yasidda maxkamadda
7. Qof kasta oo si ogaal ah u bixiyo warar been ah, ama si ula kac ah u hor-istaaga Golaha ama xubin ka tirsan Golaha gudashada xilkeeda ama si toos ah ama si dadban u

saameeya ama iskugu dayo in uu saameyn ku yeesha go'aanka Golaha Adeegga Garsoorka ama xubin kastoo ka tirsan Golaha wuxuu galayaa fal dembiyeed lagu mutaysanayo ganaax ama xabsi aan ka badnayn seddex sano oo xarig ah.

Qodobka 26aad: Magacaabidda Garsoorayaasha Maxkamadda Dastuurka

1. Golaha Adeegga Garsoorka waa in uu furaa gal ay ku diiwaan geshan yihiin dadka ay aad suurtagal u tahay iney noqdaan musharaxiin Gasoore Maxkamadda Dastuurka ee buuxin karaa shuruudaha ku xusan Qodobka 109B (2) ee Dastuurka.
2. Markii loo baahdo Golaha Adeegga Garsoorka wuxuu musharaxiinta ku xusan Faqradda (1) ee Qodobkan soo jeedin ahaan ugu gudbinayaa Baarlamaanka Federaalka kadib markii uu qiimeeyo kana baaraandego natiijadda iyo tayada hawlaha ay soo qabteen iyo wixii ay ku kordhiyeen axkaamta sharciga.

Cutubka 4: Qodobada Qubanaha

Qodobka 27aad: Miisaanayad Sanadeedka

1. Maalgelinta miisaaniyad sanadeedka Golaha Adeegga Garsoorka waa iney noqotaa mid loo qoondeeyey laguna ansixiyey si waafaqsan nidaam miisaaniyadeedka u degsan ansixinta Miisaaniyadda JFS.
2. Golaha Adeegga Garsoorka wuxuu diyaarinayaa Miisaaniyadda Golaha wuxuuna u gudbinayaa in loo ansixiyo si waafaqsan habraaca miisaaniyadda dawladda.

Qodobka 28aad: Warbixin Sanadeedka

Golaha Adeegga Garsoorka waa in ugu yaraan sanadkiiba mar u soo gudbiyaan Baarlamaanka Federaalka warbixin qoraal ah oo ku saabsan hawlqabadkiisa.

Qodobka 29aad: Xiriirka ka dhexeeya Golaha iyo Guddiyada Adeegga Garsoorka Goballada

1. Golaha Adeegga Garsoorka ee heer Federaal waa in uu xiriir wadashaqeyn la yeeshaa guddiyada Adeegga Garsoorka ee dawladda xubinta ka ah dawladda Federaalka ama hay'addaha goballeed ee kale oo u xilsaaran qorista, bedelka, dalacsiinta iyo anshax-marinta Garsoorayaasha Goballada
2. Guddiyada Adeegga Garsoorka ee dawladda xubinta ka ah dawladda federaalka ama hay'addaha goboleed ee kale oo u xilsaaran qorista, bedelka, dalacsiinta iyo

anshaxmarinta Garsoorayaasha Gobollada waa in ay u soo gudbiyaan Golaha Adeegga Garsoorka ee heer federaal warbixinno ku saabsan qorista, bedelka, dalacsiinta iyo anshaxmarinta garsoorayaasha Gobollada

3. Golaha Adeegga Garsoorka ee heer federal wuxuu si qoraal ah ku bixin karaa afkaartiisa ku saabsan warbixinnada ay u soo gudbiyeen Golaha Adeegga Garsoorka ee dawlada xubinta ka ah dawladda federaalka ama hay'adaha Goboleed kale oo u xilsaaran qorista, bedelka, dalacsiinta iyo anshax-marinta Garsoorayaasha Gobollada.

Qodobka 30aad: Mushaaraadka iyo Kharajka Xubnaha Golaha Adeegga Garsoorka

Xubnaha Golaha Adeegga Garsoorka waxey xaq u leeyihiin mushaaro, gunno, sahay safar iyo kharajyada ay galaan ayagoo fulinaaya xilkooda sida uu u dejiyey Golaha Shacabkuna ansixiyey.

Qodobka 31aad: Burin

Waxaa la buriyey sharci kasta aan la socon Karin Sharcigan iyo Xeerka Nidaamka Garsoorka hadda lagu dhaqmo n. 3 ee 12.06.1962.

Qodobka 32aad: Dhaqangalka Sharcigan

Sharcigan wuxuu dhaqangelayaa marka Barlamaanka uu ansixiyo , Madaxweynaha JFS saxiixo laguna soo saaro faafinta rasmiga.

Tusmo

Cutubka 1: Qodobada Guud	2
Qodobka 1aad: Ujeeddada Sharciga	2
Qodobka 2aad: Madaxbanaanidda Golaha.....	2
Qodobka 3aad: Maqaamka Golaha	2
Qodobka 4aad: Xarunta Golaha	2
Qodobka 5aad: Xilalka iyo Awoodaha Golaha	3
Cutubka 2aad: Dhismaha Golaha	4
Qodobka 6aad: Xubnaha Golaha.....	4
Qodobka 7aad: Habraaca Magacaabista Xubnaha Golaha Adeegga Garsoorka.....	5
Qodobka 8aad: Shuruudaha Magacaabista	5
Qodobka 9aad: Qaab-dhismeedka iyo Waajibaadka Guddoonka Golaha.....	6
Qodobka 10aad: Xoghaynta Golaha.....	7
Qodobka 11aad: Xil waayidda Xubnaha Golaha	8
Qodobka 12aad: Kulamada Golaha Adeegga Garsoorka.....	8
Qodobka 13aad: ka qeybgalka Dadweynaha iyo Daahfurnaanta	9
Cutubka 3aad: Habraacyada Gudiga	9
Qodobka 14aad: Habraaca Go' aanka	9
Qodobka 15aad: Magacaabista, Dalacaada iyo bedelka Garsoorayaasha	10
Qodobka 16aad: Xeerka Dhaqanka Garsoorka	10
Qodobka 17aad: Dacwadaha Anshaxa	10
Qodobka 18aad: Habka Dacwadda Anshax-marinta.....	11
Qodobka 19aad: Dhisidda Maxkamadda Anshax-marinta	11
Qodobka 20aad: Habraaca Maxkamadda Anshaxmarinta	12
Qodobka 21aad: Warbixinnada Maxkamadda anshax-marinta iyo talooyinka ay tixgelisay.....	12
Qodobka 22aad: Dib-u-Eegista Go'aanka Golaha	13
Qodobka 23aad: Xasaanadda.....	13
Qodobka 24aad: ka qaadista Xasaanadda Xubnaha Garsoorka.....	14
Qodobka 25aad: Awoodda Golaha ee u yeeridda Dadka.....	14
Qodobka 26aad: Magacaabidda Garsoorayaasha Maxkamadda Dastuurka.....	15
Cutubka 4: Qodobada Qubanaha	15
Qodobka 27aad: Miisaanayad Sanadeedka	15
Qodobka 28aad: Warbixin Sanadeedka.....	15
Qodobka 29aad: Xiriirka ka dhexeeya Golaha iyo Guddiyada Adeegga Garsoorka Goballada.....	15
Qodobka 30aad: Mushaaraadka iyo Kharajka Xubnaha Golaha Adeegga Garsoorka.....	16
Qodobka 31aad: Burin.....	16
Qodobka 32aad: Dhaqangalka sharcigan	16